

**OFFICE OF
LAWYERS PROFESSIONAL RESPONSIBILITY**

445 MINNESOTA STREET, SUITE 2400
ST. PAUL, MINNESOTA 55101-2139

TALEEFAN LAMBARKA (651) 296-3952
LAMBARKA LACAG LA'AANTA 1-800-657-3601

FAKIS (651) 297-5801

Tilmaamaha sida loo Gudbiyo Cabasho

Waxaad haysataa dhowr nooc oo aad ku xareyn karto cabasho: onlayn, boosto ama fakis.

Cabashooyinka waxaa lagu xereyn karaa adigoo tagaya barta <http://lprb.mncourts.gov>. Dukumintiyada taageeraya waxaa loogu diri karaa qaab elektaroonig ah ciwaanka OLPRComplaintDocs@courts.state.mn.us.

Waad daabacan kartaa foomka cabashada (ama anaga ayaa boosto kuugu soo diri karno) oo adigana kusoo dir boosto ama fakis dukumiintiyada taageeraya:

Office of Lawyers Professional Responsibility
445 Minnesota Street, Suite 2400
St. Paul, MN 55101-2139
Fakis (651) 297-5801

Waxaad naga heli doontaa warqad ku dhowaad laba toddobaad ayadoo kugu wargelinayso sida cabashadaada loo maareyn doono. Ma ahan in dhammaan cabashooyinka la baarayo. Haddii aan go'aansano inaan baarno, midkood Xafiiskeenna ama Guddiga Anshaxa Degmada (DEC) ayaa baari doona. Inta badan cabashooyinka waxaa marka hore loo gudbiyaa DEC, oo ay ku jiraan xubnaha qareennada iyo xubnaha dadweynaha ee aan qareenada ahayn. DEC waxay magacawdaa baare. Baaruhu wuxuu la xiriirayaa qareenka iyo qofka cabashada qaba (haddii macluumaad dheeraad ah loo baahdo), wuxuuna talo u soo jeediyaa Agaasimaha.

Xaalad kasta, waxaa nalooga baahan yahay inaan u dirno nuqul laga sameeyay cabashada qareenka laga cawday xitaa haddii aan go'aansanno inaan baarin cabashada. Haddii aadan ku qanacsaneyn qareenka inuu helo macluumaad gaar ah, ha ku qorin foomka cabashadaada. Baaritaanku badanaa wuxuu qaataa ugu yaraan saddex bilood ama in ka badan. Waxaa lagugu soo ogeysiin doonaa go'aanka ugu dambeeya qaab qoraal ahaan ah.